

Ku shubno ama ka tuur app-yada taleefankaaga

Waa maxay app-yada taleefanku?

"App" waxaa loosoo gaabiyay application (ablikeeshin).

Soo dejiso app-yada, si markaa aad u samayn karto waxyaabo gaar ah oo kombuyuutarkaaga, taableetkaaga, iyo taleefankaaga gacanta ah. 'app-ka taleefanku' waxaa weeye app-ka taableetka ama taleefanka gacanta.

Tusaale ahaan:

- Waxa aad isticmaali kartaa app-ka iimeelka (sida Gmail) si aad u dirto oo aad u hesho iimeelo.
- Waxa aad isticmaali kartaa app-ka daaqada bukaanka si aad ugu gasho macluumaadkaaga caafimaadka, dalbato dib u helida dawada la qoro, ama u dir fariimaha dhakhtarkaaga.

Miyaa app-yadu yihiin amaan in la isticmaalo?

Si aad u isticmaasho app amaan ah:

- Kaliya isticmaali app-yo aad garanayo.
- Fahan buuxinta sirta iyo sida app-ku u isticmaali doono xogtaada.
- Eeg inta dad ee soo dejisatay app-ka oo akhri naqdinta isticmaalaha (app-ku waa mid aan waxba ahayn hadii dad yar ay soo dejisteen iyo/ama dadku wax xun ka sheegeen).
- Markasta cusboonaysii app-yada marka ay soo baxaan nuqulo cusub si aad u xaliso mushkiladaha oo aad u ilaaliso sirtaada.
- Icticmaal app-ka daryeelka caafimaadka ee uu kugula taliyay xirfadlaha caafimaadku.


Waa maxay ogolaanshaha app-ku?

App-yada waxay u baahan yihiin ogolaanshe si ay u geli karaan macluumaad gaar ah iyo wax, sida kameerada ama taleefanka.

Mararka qaar, app-ka ayaan u shaqaynin sida saxda ah hadii aanad u ogolaan inuu galo.

Kaliya u ogolow kuwa app-ka aanu shaqaynaynin la'aantood. Ka taxadir app-yada kaa dalbada inay galaan meesha aad joogto ama macluumaadkaaga xidhiidhka hadii ayna macluumaadkan ugu baanhayn si ay u shaqeeyaan.

Sidee ayaan ugu shuban karaa app taleefankayga?

1. Qabo 'Play Store' (Android) ama 'App Store' (Apple)
2. Eeg daaqada baadhitaanka ama astaamaha
Baadh astaamaha: 
3. Ku qor magaca app-ka aad doonayso inaad soo dejisato
4. Taabo app-ka
5. Taabo "Ku shub" (Install) ama "Hel" (Get) badhanka ah (mararka qaar app-yada ayaa iib ah ama u baahan inaad bishii wax bixiso)
6. Taabo "fur" (open)
7. U ogolaw ogolaanshaha lo baahan yahay

Sidee ayaan ugu tuuri karaa app taleefankayga?

1. Taabo oo hay calaamada app-ka ee shaashada aaladaada
2. Taabo 'masax' (delete) ama 'ka tuur' (uninstall) ama 'ka saar app-ka' (remove app)
3. Xaqiiji inaad doonayso inaad masaxdo oo ka tuur app-ka, hadii aalada ay ku waydi samee tan

Macluumaad dheeraad ah ka oggow sida aad u isticmaalayso app-ka amaanka:

- Android:

Ingiriisi- <https://edu.gcfglobal.org/en/androidbasics/downloading-apps/1/>

Ingiriisi- <https://www.digitalllearn.org/courses/using-a-mobile-device-android-new>

Isbaanish- <https://www.digitalllearn.org/courses/uso-de-un-dispositivo-movil-android-nuevo>

- Apple:

Ingiriisi - <https://edu.gcfglobal.org/en/iphonebasics/installing-and-managing-apps/1/>